DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD

ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

| SANADKA 23AAD | CADADKA 8AAD | TAARIIKH: 15/08/23 | Lam. 08 |
|---|---|---|---|


## FAAFINTA RASMIGA AH

## OFFICIAL GAZETTE

## الجريدة الرسمية

# Sharciga Wax-ka-bedelka Howgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda Puntland


| TUSMADA | |
|---|---|
| Qeybta 1aad | *Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah*<br>**Sharciga Wax-ka-bedelka Howgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda Puntland** |
| Qeybta 2aad | *Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.*<br><br>*WAXBA MALEH* |
| Qeybta 3aad | *Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.*<br><br>*WAXBA MALEH* |
| Qeybta 4aad | Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.<br><br>WAXBA MALEH |
| Qeybta 5aad | Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.<br><br>WAXBA MALEH |


GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

XAFIISKA
MADAXWEYNAHA

ولاية بونت لاند
الصومالية

مكتـب
الـرئيـس

**PUNTLAND STATE OF SOMALIA**
**OFFICE OF THE PRESIDENT**

---

**Sharci Lr. 08 ee 15-ka Agoosto 2023, kuna saabsan Sharciga Wax-ka-bedelka Howlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda Puntland.**

**Madaxweynaha Dowladda Puntland**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80-aad farqadiisa 16-aad.

**Markuu arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/48/2023, kuna taariikhaysan 10-ka Agoosto 2023.

**Markuu Tixgeliyey:** Baahida loo qabo wax-ka-bedelka iyo kaabista sharcigan iyo Horumarinta Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda Puntland.

**<u>Wuxuu soo saaray</u>**

**Sharciga soo socda:**

**Qodobka 1aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Sharciga Wax-ka-bedelka Howlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda Puntland.

**Qodobka 2aad**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda

**Qodobka 3aad**

Dhaqangal Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland

**Siciid Cabdullaahi Deni**
Madaxweynaha Dawladda Puntland

**Tell: +252-090-7797147; E-mail: dg.oop@plstate.so, oop@plstate.so; Website: www.plstate.so**

**DAWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**
**GOLAHA WAKIILLADA**

**ولاية بو نت لاند الصومال**
**مجلس النواب**

**Xafiiska Guddoomiyaha**
**Office of the Speaker**

**Tix:-<u>XGGW/DPL/48/2023</u>** **Garoowe, Khamiis** **Taariikh: - 10/08/2023**

**Ku:- Madaxweynaha DPL**

**Garoowe**

**Ujeeddo: - <u>Ansixinta Wax-ka-bedelka Xeerka Hawl-gabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka ah Ee Dawladda Puntland</u>**

**Mudane Madaxweyne,**

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU: -**

**MARKUU ARKAY:-** Dastuurka Dawladda Puntland Qodobkiisa **64**-aad

**MARKUU ARKAY:-** Soo gudbinta Madaxweynaha Ref: MW/DPS/177/2022 ee October 25, 2022, kuna saabsan wax-ka-bedelka Xeerka Hawl-gabka iyo Liiltirka Shaqalaaha Rayidka ah Ee Dawladda Puntland.

**MARKUU TIX-GELIYEY: -** Baahida loo qabo Wax-ka-bedelka Iyo Kaabista Xeerka Hawl-gabka iyo Liiltirka Shaqalaaha Rayidka ah Ee Dawladda Puntland.

**MARKUU DHEGEYSTEY: -** Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu kalfadhiga 52-aad, Fadhigiisii 8-aad ee 24.06.2023 cod gacanta tag ah ku Ansixiyeen wax-ka-bedelka Xeerka Hawl-gabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka ah Dawladda Puntland. Guntanka fadhiga oo ahaa (**46**) Mudane, waxaa ugu codeeyey oggol (**42**) Mudane, Diidmo majirin, halka ay ka aamuseen (**4**) Mudane.

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

**Ansixinta Wax-ka-bedelka Xeerka Hawl-gabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka ah Ee Dawladda Puntland.**

**Wada Shaqeyn Wacan**

**Md. Cabdirashiid Yuusuf Jibriil**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

# DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA
# GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND

---

# WAX-KA-BEDDELKA XEERKA HAWL-GABKA IYO LIILTIRKA SHAQAALAHA RAYIDKA AH EE DAWLADDA PUNTLAND

## GAROOWE, LUULIYO, 2023

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

**TUSMADA XEERKA**

**CUTUBKA 1-aad** ........ 1
**QODOBO HOR-DHAC AH** ........ 1
**Qodobka 1-aad** ........ 1
**Erey Bixin** ........ 1
**Qodobka 2-aad** ........ 3
**Magaca Xeerka** ........ 3
**Qodobka 3-aad** ........ 3
**Baaxadda Xeerka** ........ 3
**Qodobka 4-aad** ........ 3
**Ujeeddooyinka Xeerka** ........ 3
**Qodobka 5-aad** ........ 3
**Saamaynta Xeerka** ........ 3
CUTUBKA 2-AAD ........ 4
Adeegga Hawlgabka Iyo Liiltirka ........ 4
**Qodobka 6-aad** ........ 4
**Muddada Bilawga Hawl-gabka iyo Liiltirka** ........ 4
CUTUBKA 3-AAD ........ 4
Maaliyadda Hawl-gabka ........ 4
**Qodobka 7-aad** ........ 4
**Maaliyadda Hawl-gabka** ........ 4
**Qodobka 8-aad** ........ 5
**Bixinta Maaliyadda Hawl-gabka** ........ 5
Cutubka 4-aad ........ 5
Xaqa Hawl-gabka ........ 5
**Qodobka 9-aad** ........ 5
**Shaqo ka fariisi da' Hawl-gab awgeed** ........ 5
**Qodobka 10-aad** ........ 6
**Hubinta Da'da Hawl-gabka** ........ 6
**Qodobka 11-aad** ........ 6
**Habka Xisaabinta iyo bixinta Xuquuqda Hawl-gabka** ........ 6
**Qodobka 12-aad** ........ 7
**Hawl-gab Soo Hormaray** ........ 7
**Qodobka 13-aad** ........ 7



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

**Tusmaynta Hawl-gabka** .......... 7
**Qodobka 14-aad** .......... 8
**Jaan-goynta Waqtiga Hawl-gabka** .......... 8
**Qodobka 15-aad** .......... 8
**Xaq U Yeelasho Hawl-gab** .......... 8
CUTUBKA 5-AAD .......... 8
Hawl-gab Naafonimo .......... 8
**Qodobka 16-aad** .......... 8
**Tilmaamaha Naafonimada** .......... 8
**Qodobka 17-aad** .......... 9
**Qiimaynta Naafonimada** .......... 9
**Qodobka 18-aad** .......... 9
**Baarista iyo Xaqiijinta Naafonimada** .......... 9
**Qodobka 19-aad** .......... 9
**Jaangoynta iyo Muddada Hawl-gabka Naafada** .......... 9
**Qodobka 20-aad** .......... 9
**Xaqa Wargelinta** .......... 9
CUTUBKA 6-AAD .......... 11
XUQUUQ HAWLGABE .......... 11
**Qodobka 21-aad** .......... 11
**Xuquuqda Qoyska Hawl-gabaha Dhintay** .......... 11
**Qodobka 22-aad** .......... 11
**Xaqa Hawl-gabaha La Waayey** .......... 11
**Qodobka 23-aad** .......... 11
**Xannaanada Caruurta.** .......... 11
**Qodobka 24-aad** .......... 12
**Joojinta Xaqa Hawl-gabka** .......... 12
CUTUBKA 7-AAD .......... 12
Liiltir .......... 12
**Qodobka 25-aad** .......... 12
**Bixinta Liiltirka** .......... 12
CUTUBKA 8-AAD .......... 12
Bixinta Hawl-gabka iyo Liiltirka .......... 12



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

**Qodobka 26-aad** .... 12
**Oggolaanshaha iyo Bixinta Hawl-gab iyo Liiltir** .... 12
**Qodobka 27-aad** .... 13
**Xaqiijinta Nolosha qofka Hawl-gabka** .... 13
**Qodobka 28-aad** .... 13
**Daryeelka ilmaha xaqa u yeesha Hawl-gabka** .... 13
**Qodobka 29-aad** .... 13
**Xannaanada Naafada** .... 13
**Qodobka 30-aad** .... 13
**Dib-u-celin Lacag Dheeraad ah** .... 13
**Qodobka 31-aad** .... 14
**Hawl-gab iyo Liiltir aan La Wareejin Karin** .... 14
**Qodobka 32-aad** .... 14
**Shuruudaha Lagu Waayi Karo Hawl-gabka iyo Liiltirka** .... 14
CUTUBKA 9-AAD .... 15
Hirgelinta Xeerka .... 15
**Qodobka 33-aad** .... 15
Asaasidda Sanduuqa Hawl-gabka .... 15
**Qodobka 34-aad** .... 15
**Guddiga Saree ee Maamulka Sanduuqa** .... 15
**Qodobka 35-aad** .... 15
**Magacaabista Guddiga** .... 15
**Qodobka 36-aad** .... 15
**Madaxbannaanida Guddiga** .... 15
**Qodobka 37-aad** .... 16
**Xilka iyo waajibaadka Guddiga** .... 16
**Qodobka 38-aad** .... 16
**Qaab-dhismeedka Guddiga** .... 16
**Qodobka 39-aad** .... 16
**Xilka iyo Waajibaadka Maamulka Sanduuqa** .... 16
**Qodobka 40-aad** .... 16
**Kulamada iyo go'aamada Guddiga** .... 16
**Qodobka 41-aad** .... 17



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

**Caddaynta Hantida Guddiga** ........ 17
**Qodobka 42-aad** ........ 17
**Kharashka Hawl-socodsiinta ee Sanduuqa Hawl-gabka** ........ 17
**Qodobka 43-aad** ........ 17
**Hanti Dhawrka iyo Hubinta Xisaabaadka** ........ 17
**Qodobka 44-aad** ........ 17
**Cabashooyinka** ........ 17
**Qodobka 45-aad** ........ 18
**Warbixinaha** ........ 18
**Qodobka 46-aad** ........ 18
**Xeer-nidaamiyeyaal** ........ 18
**Qodobka 47-aad** ........ 18
**Xogta** ........ 18
**Qodobka 48-aad** ........ 18
**Canshuur** ........ 18
**Qodobka 49-aad** ........ 19
**Burin** ........ 19
**Qodobka 50-aad** ........ 19
**Dhaqan-galka Xeerka** ........ 19



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## CUTUBKA 1-aad
## QODOBO HOR-DHAC AH
## Qodobka 1-aad
## Erey Bixin

Xeerkan gudihiisa haddii aan si kale loo fasirin, ereyada soo socda waxaa micnahoodu noqonayaa sidan;-

| Lr | Erayga | Macnaha |
|---|---|---|
| 1 | Wasaarad | Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Shaqada, Shaqaaalaha, Dhallinyarada iyo Cayaaraha Dawladda Puntland. |
| 2 | Wasiir | Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Shaqada, Shaqaaalaha, Dhallinyarada iyo Cayaaraha Dawladda Puntland. |
| 3 | Dawlad | Waxaa loola jeedaa Dawladda Puntland ee Soomaaliya |
| 4 | Dastuur | Waxaa loola jeedaa Dastuurka Dawladda Puntland ee Soomaaliya. |
| 5 | Hawl-gab | Waxaa loola jeedaa qofka Shaqaalaha rasmiga ah ee Dawladda oo gaarey da'ada Hawl-gabka ee ku tilmaaman Xeerkan. |
| 6 | Da' da Hawl-gab | Waxaa loola jeeda da'ada uu qofka shaqaalaha dawladda ahi ku mutaysto xuquuqda Hawlgabka kuna tilmaaman xeerkan. |
| 7 | Xuquuda Hawl-gabka | Waxaa loola jeedaa lacagta Hawl-gabka iyo liiltirka ee la siiyo qofka shaqaalaha ah ee sharci ahaan u mutaystay. |
| 8 | Mushahaar | Waxaa loola jeedaa lacagta xuquuq bileedka aasaasiga ah ee uu qaato qofka shaqaalaha dawladda ah, iyadoo aanay ku jirin gunnooyinka, abaal-marinta iyo lacag kasta oo ku soo gasha qaab kale. |
| 9 | Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah | Waxaa loola jeedaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee DPL oo lagu asaasay Xeer Lr.2 ee August 2019. |
| 10 | Shaqaale | Waxaa loola jeedaa Shaqaalaha Rasmiga ah u shaqeeya Hay'adaha ama Wasaaradaha Dawladda Puntland. |
| 11 | Guddi | Waxaa loola jeedaa guddiga u xilsaaran arrimaha Hawl-gabka iyo Liiltirka ee ku tilmaaman Xeerkan. |



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

| | | |
|---|---|---|
| 12 | **Carruur** | Waxaa loola jeedaa caruurta ka yar da'ada 18 sano ee uu dhalay qofka shaqaalaha ah. |
| 13 | **Qoys** | Waxaa loola jeedaa dadka xaqa u leh xuquuqda hawl-gab ee uu ka dhintay hawlgabe, waxayna ka kooban yihiin Xaaska/sayga iyo carruurta hawlgabaha dhintay. |
| 14 | **Xuquuqda Hawl-gabka** | Waxaa loola jeedaa xuquuqda uu mutaystay qofka shaqaalaha dawladda ah ee gaarey da'ada Hawlgabka. |
| 15 | **Liiltir** | Waxaa loola jeedaa nidaamka lagu xaqsiiyo laguna sagootiyo qofka shaqaalaha ah ee aan gaarin da'ada Hawlgabka, hase ahaatee uu dhammaaday xiriirkii shaqo ee kala dhexeeyey dawladda. |
| 16 | **Tabarucaad** | Waxaa loola jeedaa lacagta hawlgabka ee boqoleyda ah oo laga jaro mushaharka shaqaalaha rayidka ah ee hay'ad dawladeed. |
| 17 | **Naafanimo** | Waxaa loola jeedaa qofka shaqaalaha rayidka ah ee shaqada dawladda ku naafoobey ayna caddeeyeen Guddiga Xirfadleyaasha Caafimaadka Puntland. |
| 18 | **Xirfadleyaal Caafimaad** | Waxaa loola jeedaa guddiga xirfadle-yaasha caafimaadka Puntland. |
| 19 | **Hawl-gab soo Horumaray** | Waxaa loola jeedaa xaqsiinta shaqaalaha dhammaadka xiriirka shaqo ka hor da'ada hawlgabka. |
| 20 | **Sanduuqa Hawl-gabka** | Waa Hay'ad Dawladeed oo lagu aasaasay Xeerka, iyadoo ujeeddadu tahay in lagu diiwaan-geliyo, maamulo, laguna bixiyo hawl-gabka iyo liiltir Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda ee xuquuqdaas mutaysta. |
| 21 | **Hay'ad Dawladeed** | Waxaa loola jeedaa Wasaarad, Hay'ad madax-bannaan, waax, urur ama xarun ay dawladu leedahay. |
| 22 | **Xaas** | Waxaa loola jeedaa oorida sharci ahaan ugu dhaxday ninka shaqaalaha ah. |
| 23 | **Sayga** | Waxaa loola jeedaa sayga ay sharci ahaan ugu dhaxday oorida shaqaalaha ah. |
| 24 | **Dhaxal** | Waxaa loola jeedaa xaqa hawl-gaba dhintay |

## Qodobka 2-aad
## Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa "Xeerka Hawl-gabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda Puntland".

## Qodobka 3-aad
## Baaxadda Xeerka

Xeerkan waxaa awooddiisu ku fidsan tahay dhulka Puntland oo dhan.

## Qodobka 4-aad
## Ujeeddooyinka Xeerka

Ujeeddada Xeerkani waa:-

1. In lagu maamulo, laguna nidaamiyo xuquuqda hawl-gabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda Puntland.
2. Inuu nolol wanaagsan gaarsiiyo shaqaalaha Hawl-gabka ah.
3. In lagu xaqsiiyo shaqaalaha Rayidka ah ee mutaystay Hawl-gabka ama Liiltirka.
4. In lagu aasaaso Guddiga Sanduuqa Hawl-gabka iyo Liiltirka.
5. In la dammaanad qaado ilaalinta dakhliga hawlgaba-yaasha, naafada iyo qoysaskooda.

## Qodobka 5-aad
## Saamaynta Xeerka

1. Xeerkan waxaa lagu dhaqayaa Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda oo keli ah.
2. Xeerkani ma saamaynayo;

    b. Xubnaha Golaha Wakiillada.

    t. Xubnaha Golaha Xukuumadda.

    j. Xubnaha Golaha Garsoorka.

    x. Qof kasta oo loo magacaabo jago siyaasadeed.

    Kh. Ciidamada Qalabka sida.

    d. Shaqaalaha ka hawlgala shirkado ganacsi oo ay dawladdu leedahay iyo Bangiyada dawladda.

    r. Shaqaalaha aan joogtada ahayn iyo qandaraasleyaasha dawladda, kuwaasoo shaqeeya waqti xadidan oo aan lagu magacaabin sharciga magacaabidda shaqaalaha dawladda.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

s. Shaqaalaha ganacsiyada gaarka loo leeyahay.

sh. Shaqaalaha Dawladaha Hoose

## CUTUBKA 2-AAD
## Adeegga Hawlgabka Iyo Liiltirka
## Qodobka 6-aad
## Muddada Bilawga Hawl-gabka iyo Liiltirka

1. Muddada mutaysiga hawl-gabka iyo Liiltirka waxaa laga soo bilaabayaa taariikhda uu qofka shaqaalaha ahi bilaabay shaqada dawladda, taasoo ka bilaabmaysa maalinta la magacaabo ilaa maalinta uu dhammaado xiriirkii shaqo ee dawladda kala dhexeeyey.
2. Hay'ad dawladeed haddii ay qofka shaqaalaha ah ugu xoojiso ergin Hay'ad Dawladeed oo kale, Urur Caalami ah ama ganacsi gaar loo leeyahay, waa loo xisaabinayaa xuquuqda hawl-gab ee ka dhalata gudashada waajibaadkaas, waase haddii Hay'adda lagu wareejiyey ay magaca Hay'adda shaqaalaha uga jarto maaliyadda hawlgabka (tabarucaadka) sanduuqa.
3. Haddii ay dhacdo in Shaqaale Rayid ah oo horay shaqada uga baxay inta aanu gaarin da'da Hawl-gabka dib loogu magacaabo xil, waa loo xisaabinayaa xaquuqdii hawl-gabka ee adeegii uu horay u soo qabtay haddii uusan dalban Liiltirkiisa.

## CUTUBKA 3-AAD
## Maaliyadda Hawl-gabka
## Qodobka 7-aad
## Maaliyadda Hawl-gabka

1. Wasaaradda Maaliyadda iyo Shaqaalaha Hawl-gabku ku waajibey waxay u bixinayaan Maaliyadda (Tabarucaadka) hawl-gabka sidan soo socota:-
   b. Qof kasta oo ka mid ah shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladdu wuxuu ka Bixinayaa mushahaar bileedkiisa aasaasiga ah boqolkiiba Shan (5%).
   t. Dawladdu waxay bil walba ku kabaysaa maaliyadda (Tabarucaadka) hawl-gabka Boqolkiiba Shan (5%) ee mushahar bileedkiisa aasaasiga ah ee qof kasta oo Shaqaale ah.
2. Dawladda iyo qof kasta oo shaqaale ah oo ay ku waajibtey bixinta Maaliyadda Hawl-gabku waxay ka bilaabmaysaa maalinta uu shaqada soo galo, waxayna ku eg tahay maalinta uu dhammaado xiriirkii shaqo ee Hay'adda Dawladda kala dhexeeyey.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA
STATE GENERAL SOLICITOR

3. Qiimayn walba oo lagu sameeyo Sanduuqa Hawl-gabka, xaddiga tabarucaad dib ayaa loo qiimaynayaa si loo hubiyo sugnaanshaha dhaqaalaha Sanduuqa Hawlgabka.

   b. Hadii Xafiiska dib u qiimayntu iswaafajin sameeyo koror ama naaqus xaddiga tabarucaadka, Sanduuqa Dhaqaalaha waxaa waajib ku ah in uu wargeliyo Wasiirka Muddo Soddon (30) maalmood gudahood ah, laga bilaabo marka xafiiska qiimayntu amarka bixiyo.

   t. Wasiirka waxaa waajib ku ah inuu wargeliyo Golaha Wasiirada Puntland muddo Soddon (30) maalmood gudahood ah, haddii warbixinta qiimayntu soo jeediso koror ama naaqus.

4. Lacagta ku xusan farqada 2-aad iyo 3-aad, waxaa lagu haynayaa madax-xige u gaar ah ee Miisaaniyadda Dawladda lamana wareejin karo si kharash kale loogu isticmaalo.

5. Shaqaalaha dawladda waxaa laga saxiixayaa in Lacagta hawl-gabka ee laga jaro ay tahay deeq lacageed oo uu ugu deeqay sanduuqa hawl-gabka iyo Liiltirka, si loogu dhaqaaleeyo shaqaalaha gaara da'da hawl-gabka.

## Qodobka 8-aad
## Bixinta Maaliyadda Hawl-gabka

1. Guddiga Sanduuqa Hawl-gabku wuxuu shaacinayaa habraacyada sanduuqa, kuna wargelinayaa Hay'adaha Dawladda muddo (6) bilood gudahood ah, marka uu Xeerkani dhaqangalo si waafaqsan Dastuurka Dawladda Puntland.

2. Kabka Dawladda iyo tabarucaadka shaqaalaha ku waajibay waa in Wasaarada Maaliyaddu ay si bille ah ugu shubtaa koontada gaarka ah ee Sanduuqa Hawl-gabka Bangiga uga furan.

3. Xogta la kaydiyey iyo xogaha kale ee Hay'adaha Dawladdu u gudbinayaan Sanduuqa Hawl-gabka wuxuu noqon karaa warqad ama mid danabaysan.

## Cutubka 4-aad
## Xaqa Hawl-gabka
## Qodobka 9-aad
## Shaqo ka fariisi da' Hawl-gab awgeed

1. Qofka Shaqaalaha Dawladda ah wuxuu shaqada kaga fariisanayaa;

   b. Da'da hawl-gabka shaqaaluhu waa lixdan iyo Shan (65) sano Lab iyo Dhedigba.

2. Iyadoo la tix-gelinayo duruufo gaar ahaaneed, qofka shaqaalaha ah waxaa loo oggolaan karaa inuu shaqada ka fariisto ka hor inta aanu gaarin da'da hawl-gabka ee ku xusan farqada 1-aad ee qodobkan.
3. Qofka shaqaalaha ah ee shaqada uga fariista arrimaha ku xusan farqada 1-aad iyo 2-aad, wuxuu xaq u leeyahay in loo oggolaado xuquuqda hawl-gabka si waafaqsan Xeerkan.
4. Qofka shaqaalaha ah ee qaata xuquuqda hawl-gabka ma qaban karo shaqo Dawladeed.

## Qodobka 10-aad
## Hubinta Da'da Hawl-gabka

1. Qof kasta oo la qorayo Shaqada Dawladda Puntland, inta uusan hawl-gelin, waa inuu qoraal ahaan ku caddeeyaa waqtiga dhalashadiisa, keenaana warqadda dhalashada ama dukuminti kale oo la aqoonsan yahay oo caddaynaya sugnaanta taariikhda uu dhashay.
2. Haddii shaki galo taariikhda uu dhashay qofka shaqaalaha ahi waxaa Wasaaradda Caafimaadka ee Dawladda Puntland ka dib markay hesho codsiga Wasaaradda u gudbinaysaa Guddiga Xirfadlayaasha Caafimaadka Puntland, si ay u soo xaqiijiyaan.

## Qodobka 11-aad
## Habka Xisaabinta iyo bixinta Xuquuqda Hawl-gabka

1. Hawl-gabka lacageed oo la siinayo shaqaalaha si xiriir ah ugu shaqeeyey Dawladda muddo labaatan (20) sano ah ama in ka badan gaareyna da'da hawl-gabka, waxaa xuquuqdooda hawl-gab loogu xisaabinayaa sida soo socota:
   b. Korarka xuquuqda hawl-gabku wuxuu u dhigmayaa hal iyo bar boqolkiiba (1.5%) mushahaar bileedkiisa aasaasiga ah uu helo Shaqaalaha Rayidka ee halkii sanaba marka uu gudanayo mudada shaqada.
   t. Qof kasta mushahaarkiisa hawl-gab wuxuu la kordhayaa kororka celceliska mushahaarka Shaqaalaha Rayidka ah laga bilaabo sannadka uu muteystay ilaa sanadka hawl-gabka ee qofka xaqa u leh hawl-gabka.

**Tusaale: -**

Lacagta Hawl-gabka: celceliska mushahaarka qofka X 1.5% X (inta bilood ee uu shaqeeyay/12).

   j. Korarka hawl-gabku wuxuu la socdaa hal iyo bar boqolkiiba (1.5%) oo lagu dhuftay mushahaarkii bishii ugu dambaysay ee dhammaatay ee xaqa hawl-gabka Shaqaalaha, kaasoo lagu dhuftay sannadaha adeeg horay loo qabtay.



XARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

2. Lacagta ugu yar ee hawl-gab loo bixiyo, taasoo la siinayo shaqaalaha hawl-gabka noqday waxay noqonaysaa $30 (soddon) doolar ama lacag Soomaali u dhiganta.

## Qodobka 12-aad
## Hawl-gab Soo Hormaray

1. Haddii ay dhacdo inuu shaqada ka fariisto shaqaale hawl-gab xaq u leh, isagoo aan gaarin da'dii hawl-gabka xaqa hawl-gabka waxaa lagu soo koobayaa boqolkiiba hal barkii (0.5%) bil walba, taasoo shaqo ka fariisigu ka horreeyo da'da hawl-gabka.
2. Lacagta ugu yar ee hawl-gabka ee ku xusan qodobka 11-aad farqadiisa 2-aad ma saamaynayso hawl-gabka soo horumara.

## Qodobka 13-aad
## Tusmaynta Hawl-gabka

1. Sanduuqa Hawl-gabku wuxuu taxayaa hawl-gabka iyo xaqlaha laga dhintay lacagtooda sida ugu sahlan:
   b. Kororka celceliska billaha ah ee qiimaha badeecadda ee sannadle ah wuxuu ka bilaabanayaa kowda bisha Maajo ee sannadkii hore ilaa Abriil 30th ee sannadka taagan sida uu go'aamiyey Sanduuqa hawl-gabku.
   t. Kororka celcelisku mushahaarka shaqaalaha ee Dawladda Puntland wuxuu bilaabanayaa xilli sanadeedka dhammaanaya 30 ka Abriil ee sanandkii hore ilaa sannad xisaabeedka la joogo sida uu go'aamiyey Maamulka Sanduuqa hawl-gabka.
2. Guddiga Sanduuqa Hawl-gabku wuxuu isku fariisinayaa qiimaynta badeecadaha ee celceliska billaha ah iyo celceliska mushahaaraadka Shaqaalaha Rayidka ah muddo sagaashan (90) maalmood gudahood ah ka dib marka ay helaan oggolaanshaha ugu dambeeya ee bangiga dhexe ee dawladda. Sanduuqa Hawl-gabku dib uma celin karo taariikhda isku dheelitirka qiimaha badeecadda iyo xaqa hawl-gabka ama qofka laga dhintay helayo.
3. Sanduuqa Hawl-gabku ma dhimi karo lacagta hawl-gabka sabab la xiriirta isku dheelitirka qiimaha.



XAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 14-aad
## Jaan-goynta Waqtiga Hawl-gabka

1. Qofka shaqaalaha Dawladda ahi wuxuu xuquuqda hawl-gabka ku mutaysanayaa gudashada waajibaadka shaqo, taasoo ka bilaabmaysa maalinta uu shaqada rasmiga ah bilaabay, kuna qotonta da'da qofka shaqaalaha ah.
2. Xisaabinta Hawl-gabka, xaqiijinta xaqlaha laga dhintay, bixinta xuquuqda iyo muddada loo qoondeeyey waxaa u xil-saaran maamulka sanduuqa hawl-gabka.

## Qodobka 15-aad
## Xaq U Yeelasho Hawl-gab

Dawladda xaq looguma laha inay bixiso wax ka badan hal-hawlgab.

# CUTUBKA 5-AAD
# Hawl-gab Naafonimo
## Qodobka 16-aad
## Tilmaamaha Naafonimada

1. Qofka shaqaalaha ah ee shaqada uga fariista dhaawac sababay naafonimo oo ka soo gaarey shaqada dawladda, wuxuu xaq u yeelanayaa xuquuq hawl-gab Naafonimo.
2. Guddiga Xirfadlayaasha Caafimaadka Puntland ayaa soo qiimaynaya qofka shaqaalaha dawladda ah ee naafonimada soo dalbaday kadib marka uu helo codsiga Wasaaradda iyo Guddiga sanduuqa.
3. Baaritaan ka dib, Haddii Guddiga Xirfadleyaasha Caafimaadka ay u caddaato in qofka shaqaalaha ahi buuxiyo shuruudaha naafanimo ee ku xusan xeerkan, waxay go'aamin doonaan;

    b. In qofkaasi ku sifoobey naafonimo.

    t. In codsadaha naafanimo aanu gebi ahaanba awoodin wax shaqo ah ee uu xuquuq ku kasban karo waqtiga uu codsiga soo gudbistey.

    j. Baaris caafimaad oo cadaynaysa in codsaduhu uu la dhibaatoonayo xaalad caafimaad iyo taariikhda naafonimadiisu bilaabatay, in baaritaanku qeexo nooca naafanimada iyo dhibaatada gaarka ah ee ay ku hayso naafada uu la shaqaysan waayey.

    x. Qiimayn la xiriirta hawl-maalmeedkiisa shaqo ee codsadaha iyo hawlaha la xiriir shaqaalanimada, waa in lagu daraa tix-raac shaqooyinkii hore ee codsadaha.



XAAFIISKA GUUD'EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

kh. In la go'aamiyo in codsaduhu qaban karo shaqo iyo in kale, nooc kasta oo awooddiisa ah, iyadoo la tixgelinayo xaaladdiisa naafonimo.

3. Codsaduhu wuxuu guddiga sanduuqa hawl-gabka u gudbisan karaa codsi uu kaga dalbanayo lacagta hawl-gabka muddo hal (1) sano gudeheed ah, laga soo bilaabo marka ay naafonimadiisu caddaato.

## Qodobka 17-aad
## Qiimaynta Naafonimada

1. Dadka naafada ah ee ku xusan qodobka 16-aad, haddii lagu daryeelo xarun dawladeed ama si kale dawladdu u xannaanayso, xaq uma yeelanayaan hawlgab naafonimo.
2. Qofka isagoo qaata hawl-gabka naafonimo dib u bilaaba shaqo rasmi ah ama iskii u shaqaysto wuxuu luminayaa xuquuqdii hawlgab.

## Qodobka 18-aad
## Baarista iyo Xaqiijinta Naafonimada

1. Si xaaladda naafonimo ee qofka loo xaqiijiyo, Guddiga Sanduuqa Hawl-gabku wuxuu codsadaha ka dalban karaa, inuu keeno cadaynta Guddiga Xirfadlayaasha Caafimaadka.
3. Haddii lagu guul darraysto in la aado baaris caafimaad sida qodobkan ku cad, codsaduhu wuxuu luminayaa xuquuqda helidda hawl-gabka naafada.

## Qodobka 19-aad
## Jaangoynta iyo Muddada Hawl-gabka Naafada

1. Shaqaalaha naafada ah wuxuu xaq u yeelanayaa helidda lacagta hawl-gabka naafada oo u dhiganta xaqii shaqaaluhu heli lahaa, haddii shaqaalahaasi wadan lahaa adeegga uu xuquuqda hawlgabka ku heli lahaa.
2. Hawl-gabka naafada waxaa la bixinayaa oo shaqaaluhu helayaa inta qofku nool yahay, haddii aanan shaqaaluhu ka bogsan naafonimadii markii hore loogu oggolaaday inuu qaato.

## Qodobka 20-aad
## Xaqa Wargelinta

1. Guddiga Sanduuqa Hawl-gabku wuxuu si rasmi ah qoraal ahaan ugu wargelinayaa go'aanka laga gaaray codsiga codsadaha muddo soddon (30) maalmood gudahood ah laga bilaabo maalinta uu codsaduhu codsiga gudbistay.



XAFIISKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND / STATE GENERAL SOLICITOR

2. Qofka helaya lacagta hawl-gabka naafada wuxuu markiiba wargelinayaa Sanduuqa naafada, haddii wax isbedel ah ku yimaadaan xaaladdiisa dhaqaale, taasoo saamayn ku yeelan karta xuquuqdiisa hawlgabka naafada.
3. Guddiga Sanduuqu wuxuu fasax u siin karaa shaqaalaha Sanduuqa in ay sameeyaan hubin aan safmar ahayn ama mid nidaamsan oo la xiriirta helidda lacagta Sanduuqa hawl-gabka si loo xaqiijiyo xaqiiqada la xiriirta codsigooda iyo sii wadashada xaq u lahaanshaha qaadashada lacagta hawl-gabka naafada. Muhiim ma ahan in la sii sheego baaridda la samayn doono, iyadoo maanka lagu hayo in baariddu dhici doonto waqti munaasib ah.
4. Shaqaalaha sanduuqu marka ay samaynayaan baaritaan waa in ay haystaan oggolaansho ay ku samayn karaan xaqiijinta codsiyada, marka laga dalbadana waa inay soo bandhigi karaan, isla markaana ku dhaqmaan xuduudda awoodohooda.
5. Sanduuqa Hawl-gabku waa in uu si joogto ah kormeer ugu sameeyo dadka qaata hawl-gabka naafada si loo xaqiijiyo joogtaynta xuquuqda naafonimo, sidoo kalena la qiimeeyo suurta-galnimada in ay noqon karaan shaqaale iyo in ay iskood u shaqaysan karaan ama in ay haystaan shaqo kale oo rasmi ah.
6. Dadka qaata xuquuqda hawl-gabka naafanimo waxaa looga baahan yahay in ay maraan baaris caafimaad oo Guddiga sanduuqu go'aaminayo goobta iyo waqtiga.
7. Haddii hawl-gabuhu ku guul darraysto in uu wada shaqayn buuxda la yeesho Sanduuqa hawl-gabka ka dib marka ay soo gudbiyaan qoraal rasmi ah oo ay ku codsanyaan in ay kormeer iyo xaqiijin ku sameeyaan sii wadashada lacagta hawl-gabka naafonimo, wuxuu sanduuqu xaq u yeelanayaa;

   b. In uu ka joojiyo xuquuqda uu qofkaasi helo.

   t. Xuquuqdu waa sii xanibnaanaysaa ilaa iyo inta laga samaynayo baaritaan Dhammaystiran.

   j. Markaas ka dib, haddii ay caddaato in qofku xaq u leeyahay qaadashada Xuquuqda hawl-gabka naafonimo, waxaa la siin doonaa lacagtii ka baaqatay.



XAFIISKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND / STATE GENERAL SOLICITOR

## CUTUBKA 6-AAD
## XUQUUQ HAWLGABE

### Qodobka 21-aad
### Xuquuqda Qoyska Hawl-gabaha Dhintay

1. Xaqa hawl-gabaha dhintay waxaa lagu xannaanaynayaa qoyskii uu ka dhintay.
2. Xaqlayaasha ku xusan faqrada 1-aad, waxay xaq u yeelanayaan xaqa hawl-gabaha dhintay oo ku salaysan cadadka lacagta hawl-gab ee uu heli jirey sida;-

   b. Haddii hawl-gabuhu dhinto isagoo aan dhammaysan muddadii uu Hawl-gabka ku mutaysan lahaa.

   t. Haddii hawl-gabuhu dhinto isagoo aan gaarin da'dii uu ku hawl-gabi lahaa.

3. Haddii qof hawl-gab xaq u lahaa uu dhinto sabab la xiriirta shaqada, waxaa qoyskiisu xaq u yeelanayaa lacagtii hawl-gabaha dhintay iyo xuquuq magdhow.

### Qodobka 22-aad
### Xaqa Hawl-gabaha La Waayey

Marka la waayo shaqaale xaq u leh xaquuqda hawl-gabka muddo afar (4) sano ah, Sanduuqa Hawl-gabku wuxuu u qaadanayaa shaqaalihii xaqa hawl-gabka lahaa in uu dhintay.

### Qodobka 23-aad
### Xannaanada Caruurta.

1. Carruurta, wiilal iyo gabdhaba ee uu ka tegey hawlgabaha dhintay, waxay xaq u yeelanayaan in ay helaan lacagta hawl-gabaha dhintay ilaa ay waxbarashadooda ka dhammaysanayaan ama ugu yaraan ka gaarayaan da'da kow iyo labaatan (21) sano.
2. Haddii ay caddaato in ilmuhu kor u dhaafay kow iyo labaatan (21) sano ayna caddaato inuu naafo yahay xilliga dhimashada qofka hawlgabka xaqa u lahaa, wuxuu xaq u yeelanayaa inuu helo daryeel ilaa iyo inta uu ka bogsoonayo naafanimada. Guddiga Xirfadlayaasha Caafimaadka Puntland ee la aqoonsan yahay ayaa soo xaqiijinaya sida Xeerkan ku cad in naafanimadu ka hor istaagayso inuu shaqaysto, korinta ilmaha naafada ah ka dib marka uu dhinto qofkii lacagta hawl-gabka xaqa u lahaa, xaq u yeelan maayo inuu helo xaquuqda hawl-gabka haddii uu kor u dhaafay da'da kow iyo labaatan (21) sano waqtiga uu dhintay qofka shaqaalaha rayidka ah.

3. Marka ilmuhu gaaro da'da kow iyo labaatan (21) sano ama uu ka bogsado naafanimada, waxay noqon doontaa bisha ugu dambaysa ee la siiyo xuquuqda hawlgabaha dhintay.

4. Xuquuqda hawl-gabka dhintay waxaa la siin karaa ilmaha keliya marka ay soo xaqiijiyaan da'da ilmaha, iyadoo la soo raacinayo shahaadada dhalashada ama Guddiga



XAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Xirfadlayaasha Caafimaadka Puntland ee la aqoonsan yahay ay soo sameeyaan qiimayn dabadeedna ay siiyaan shahaadada da'da. Da'da ilmaha ee kaydka hawl-gabka loo geliyo, waa in ay noqotaa kama dambays cad oo sharci ah, waana in aanay noqon mid dib u eegis aan qofna ku samayn karin, sabab kasta ha ahaatee.

## Qodobka 24-aad
## Joojinta Xaqa Hawl-gabka

1. Sanduuqa Hawl-gabku wuxuu joojinayaa bixinta lacagta hawl-gabka ee uu heli jiray qofka xaqa u leh xuquuqda hawl-gabaha dhintay ka dib bisha uu dhinto ama ay joogsato xaq u lahaanshihiisa.

2. Marka qof qaadanayey lacagta xuquuda hawl-gabaha dhintay uu lumiyo, waxaa lacagta soo harta si siman loogu qeybinayaa xaqlayaasha kale ee xaqa u leh xuquuqda hawlgabaha dhintay.

# CUTUBKA 7-AAD
# Liiltir
## Qodobka 25-aad
## Bixinta Liiltirka

1. Liiltir waa nidaam lagu dhaqo laguna sagootiyo shaqaalaha aan gaarin muddada hawl-gabka hase ahaatee uu dhammaaday xiriirkii shaqo oo kala dhexeeyey Dawladda Puntland ama xubnaheeda.
2. Qofka Shaqaalaha Rayidka ah ee aan gaarin da'da hawl-gabka isla markaasna si joogto oo xiriir ah u soo hayey Shaqada Dawladda muddo hal (1) ilaa 19 (Sagaal iyo toban) sano ah, waxay xaq u yeelanayaan lacag Liiltir ah oo u dhiganta bil mushaharkeed sannad kasta oo ay shaqeeyeen ka dib marka uu dhammaado xiriirkooda shaqo oo kala dhexeeya Hay'adda Dawladeed oo ay u shaqeynayeen.
3. Guddiga Sanduuqa wuxuu bixinayaa Liiltirka Sodon (30) maalmood gudahood, marka uu dhammaado xiriirka shaqo ee ka dhexeeyey codsadaha iyo Hay'adda Dawladeed ee uu u shaqeynayey.

# CUTUBKA 8-AAD
# Bixinta Hawl-gabka iyo Liiltirka

## Qodobka 26-aad
## Oggolaanshaha iyo Bixinta Hawl-gab iyo Liiltir

Marka uu dhamaado xiriirka shaqaalanimo ee u dhexeeya shaqaale Rayid ah iyo Hay'ad Dawladeed, hawl-gabka iyo Liiltirka waxaa ansixinaya Sanduuqa Hawl-gabka, kadib marka ay soo jeedin ka helaan Hay'adda Dawladeed ee uu u shaqaynayey qofka shaqadiisu dhammaatay, lacagtana waxaa bixinaya Sanduuqa Hawl-gabka.



XAFIISKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 27-aad
## Xaqiijinta Nolosha qofka Hawl-gabka

1. Guddiga Sanduuqa Hawl-gabku wuxuu faafinayaa shuruudaha Sanduuqa lix (6) bilood gudahood marka uu xeerkani dhaqangalo, si ay uga dalbadaan dadka xaqa u yeeshay xuquuqda hawl-gabka.

2. Guddiga Sanduuqa Hawl-gabku wuxuu ka dalban karaa qofka xuquuqda hawl-gabka qaata inuu soo diro warbixin sannadle ah si loo xaqiijiyo in uu nool yahay una sii wadan karo helidda xuquuqdiisa iyo inuu ka dalban karo inuu xafiiska horyimaado sannadkiiba hal mar.

## Qodobka 28-aad
## Daryeelka ilmaha xaqa u yeesha Hawl-gabka

1. Carruurta yar yar oo xaqa u yeeshay xaq hawl-gabaha dhintay, waxaa loogu dhiibayaa qofka mas'uulka ka ah ilmahaas.
2. Haddii waalidka ilmahaas dhalay nool yahay, Sanduuqu wuxuu u qaadanayaa in waalidkaasu yahay koriyaha ilmaha Haddii aan go'aan Maxkamadeed u diidin ama qof kale Mas'uuliyadaas siin.

## Qodobka 29-aad
## Xannaanada Naafada

1. Guddiga Xirfadleyaasha Caafimaadka ayaa awood u leh xaqiijinta iyo go'aaminta in qofka naafada ah ee xaqa u yeeshay hawl-gab naafanimo aanu awoodin inuu maamusho xuquuqda hawl-gabka.
2. Haddii ay sugnaato in qofka naafada ah ee mutaystay xaqa naafanimo aanu awoodin maamulashada xuquuqdiisa, si waafaqsan farqada 1-aad ee qodobkan, maxkamadda awoodda u leh ayaa u magacaabaysa mas'uul wakiil uga noqda xuquuqdaas.

## Qodobka 30-aad
## Dib-u-celin Lacag Dheeraad ah

1. Haddii Guddiga Sanduuqa hawl-gabku bixiyo lacag ka badan intii la siin lahaa qofka hawl-gabka noqday sabab kasta ha ku timaadee, guddigu wuxuu xaq u leeyahay in lacagtaa dib loogu soo celiyo wuxuuna ku wargelinayaa si qoraal ah qofka hawl-gabka ah ee qaatay lacagta dheeraadka ah.
2. Haddii qofka hawl-gabka qaatay uu dib u soo celin waayo lacagta dheeraadka ah ee ku xusan faqrqada 1-aad, guddigu wuxuu xaq u leeyahay inuu xuquuqda hawl-gabka ka hakiyo lacag u dhiganta lacagta dheeraadka ah ee uu qaatay.



XAFIISKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

3. Haddii ay caddaato in qofku aanu mar dambe xaq u lahayn helidda lacagta xaqa hawl-gabka, sanduuqu wuxuu dalban karaa in loo soo celiyo dhammaan lacagihii dheeriga ahaa hal mar, waxaa suuragal ah in sanduuqu u diyaariyo hannaan dib u bixin lacagta Sanduuqa ka maqan, sanduuqu wax dulsaar ah ku soo rogi maayo lacagaha noocaan ah, qofka lacagta hawl-gabka ee dheeriga ah qaatay waxaa laga rabaa inuu aqbalo heshiiska hannaanka dib u bixinta.
4. Haddii qofka hawl-gabka ah ee qaatay lacagta dheeraadka ah uu dib u soo celin waayo ama diido in uu oggolaado hannaanka dib u bixinta ee loo soo bandhigay, Guddiga Sanduuqu wuxuu xaq u leeyahay inuu ku furo dacwad dib u soo celin lacagta ku maqan.

## Qodobka 31-aad
## Hawl-gab iyo Liiltir aan La Wareejin Karin

1. Hawl-gabka iyo Liiltirka xeerkani xusayo laguma reebi karo, loomana wareejin karo cid kale.
2. Hawl-gab ama Liiltir maxkamaddu way joojin kartaa deyn dawladdu qofka ku leedahay awgeed.
3. Maxkamaddu waxay amar ku bixin kartaa joojinta hawlgabka ama Liiltirka, si loogu gudo deyn qofku ka qabo dad gaar ah, taasoo waafaqsan Xeerka madaniga ee Soomaaliya.

## Qodobka 32-aad
## Shuruudaha Lagu Waayi Karo Hawl-gabka iyo Liiltirka

1. Xaq uma laha hawlgab ama Liiltir qofka shaqaalaha ah oo shaqada looga eryey sababaha soo socda;

   b- Talaabo anshaxeed

   t- Xukun Maxkamadeed oo kama dambays ah oo aan ka yarayn saddex (3) sano, haddii lagu xukumo dacwo ciqaab ah oo ka dhalatay shaqada rasmiga ah oo loo isticmaalay ka faa'iidaysasho aan sharci ahayn, xatooyo xoolo dadweyne, tuugo, khiyaano iyo dembi kasta oo ka reebaya qofka shaqaalaha ah inuu qabto shaqo dawladeed.

2. Qofka shaqaalaha ah ee ku sugnaada xaaladda lagu xusay xarafka (b) ee faqrada 1-aad ee isla qodobkan, waxaa la siinayaa lacagta looga goyn jirey hawl-gabka ama Liiltirka.



XAAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## CUTUBKA 9-AAD
## Hirgelinta Xeerka

### Qodobka 33-aad
### Asaasidda Sanduuqa Hawl-gabka

1. Xeerkan waxaa lagu aasaasay Sanduuqa Hawl-gabka iyo Guddiga Maamulka Sanduuqa hawl-gabka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda.
2. Ujeeddooyinka Sanduuqa Hawl-gabku waxay noqonayaan;

   b. Bixinta xuquuqda Hawl-gabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda.
   t. Dhiiri-gelinta iyo kor u qaadidda daryeelka shaqaalaha rayidka ah, iyadoo la hubinayo inay helaan lacag ku filan nolol maalmeedkooda marka ay hawl-gabka noqdaan.

### Qodobka 34-aad
### Guddiga Saree ee Maamulka Sanduuqa

1. Sanduuqa Hawl-gabka iyo Liiltirka shaqaalaha, waxaa maamulaya guddiga lagu aasaasay xeerkan.
2. Guddigu wuxuu ka kooban yahay afar (4) xubnood oo kala ah;

   b. Wasiirka Wasaaradda Shaqada, Shaqaalaha, Dhallinyarada iyo Cayaaraha.
   t. Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.
   j. Xubin Guddiga Shaqaalaha Rayidka.
   x. Guddoomiyaha Bankiga dhexe.

3. Guddigu wuxuu xallinta khilaafaadka oo la xiriira cabashooyinka ka dhanka ah Sanduuqa u magacaabi karaa guddi-hoosaad ka mid ah xubnaha guddiga.

### Qodobka 35-aad
### Magacaabista Guddiga

Guddiga lagu xusay farqada 2-aad ee qodobka 34-aad, waxaa digreeto ku soo saaraya Madaxweynaha Dawladda Puntland mudo afartan iyo Shan (45) casho gudahood ah laga bilaabo maalinta xeerkani dhaqangalo, waxayna ku imaanayaan xilkooda.

### Qodobka 36-aad
### Madaxbannaanida Guddiga

1. Guddiga Hawl-gabku wuxuu yeelanayaa madax-bannaani maamul, wuxuuna u hoggaansamaa sharciga oo keliya, waxayna wada shaqayn la leeyihiin Wasaaradda.
2. Guddiga Sanduuqa Hawl-gabku waa Hay'ad Dawladeed oo leh shaqsiyad qaanuuneed, wuxuuna awood u leeyahay inuu wax dacweeyo lana dacweyn karo.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 37-aad
## Xilka iyo waajibaadka Guddiga

1. Maamulka guud ee Sanduuqa Hawl-gabka.
2. Hubinta iyo bixinta xuquuqda hawl-gabka.
3. Jaangoynta muddada hawl-gabka si waafaqsan Xeerka.
4. Inuu ka guddoomo maaliyadda hawl-gabka ee ka soo xeroonaysa Dawladda iyo Shaqaalaha Rayidka ah.
5. Go'aaminta kharashaadka sanduuqa.
6. Oggolaanshaha haynta iyo maaraynta tabarucaadyada soo gaara.

## Qodobka 38-aad
## Qaab-dhismeedka Guddiga

1. Qaab-dhismeedka guddigu wuxuu noqonayaa;

    b. Guddiga sare ee sanduuqa hawlgabka.
    t. Maamulka Sanduuqa hawlgabka.

2. Maamulka sanduuqu wuxuu ka kooban yahay, maamule, Khasnaji, madaxa Gobollada iyo madaxa shaqaalaha.

## Qodobka 39-aad
## Xilka iyo Waajibaadka Maamulka Sanduuqa

1. Hubinta iyo maamulka hantida sanduuqa.
2. Habsami u socodka hawlaha sanduuqa iyo in sidii xeerku dhigayey loo soo xereeyey tabarucaadka sanduuqa.
3. Shaqada maalin-laha ah ee sanduuqa.

## Qodobka 40-aad
## Kulamada iyo go'aamada Guddiga

1. Guddiga sanduuqa Hawl-gabku wuxuu kulmayaa saddexdii biloodba hal mar.
2. Kulamada guddigu waxay ansax noqonayaan marka ay joogaan ugu yaraan saddex xubnood uu guddoomiyuhu ku jiro.
3. Go'aammada guddigu waxay ku meel-marayaan cod aqlabiyad hal-dheeri ah xubnaha kulanka fadhiya.
4. Haddii natiijada cod-bixintu laba jeer is le'ekaato, guddoomiyaha ayaa wuxuu yeelanayaa cod dheeri ah.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 41-aad
## Caddaynta Hantida Guddiga

1. Xubnaha Guddigu marka ay xafiiska qabtaan, Soddon (30) beri gudohood waa inay u caddeeyaan Hantidhawrka guud hantidooda gaarka ah, si waafaqsan qodob 77-aad, farqadiisa 3-aad ee Dastuurka.
2. Xubnaha Guddiga Sanduuqa Hawl-gabku waa in ay shaaciyaan nooc walba oo keeni kara dano is-diidan oo suuragal ah, iyagoo ixtiraamaya go'aamada la gaarey.

## Qodobka 42-aad
## Kharashka Hawl-socodsiinta ee Sanduuqa Hawl-gabka

1. Sanduuqu wuxuu yeelanayaa kharash lagu socodsiiyo hawlihiisa.
2. Ilaha dhaqaalaha sanduuqu waxay noqonayaan;
   - b. Lacag ay dawladdu bixiso.
   - t. Lacag sanduuqa loogu deeqay.
3. Qoondada kharashka Sanduuqa waxaa lagu caddaynayaa Miisaaniyad sannadeedka Sanduuqa.
4. Guddigu waxay abuurayaan koonto xisaabeed oo loogu talo galay kharashka hawlsocodsiinta Sanduuqa, kana baxsan koontada Maaliyadda hawlgabka.

## Qodobka 43-aad
## Hanti Dhawrka iyo Hubinta Xisaabaadka

1. Guddiga Sanduuqu waxay magacaabi karaan hantidhawre gudaha ah oo madaxbannaan, iyadoo aan wax loo dhimayn awoodaha iyo waajibaadka Hanti-dhawrka guud ee dawladda Puntland.
2. Hantidhawrka guduhu isagoo oggolaansho ka haysta Guddiga wuxuu hubinayaa, baarayaa, dhammaan dukumentiyada, galalka iyo shaqaalaha Sanduuqa.
3. Natiijada ka soo baxda baarista Hanti-dhawraha gudaha wuxuu u gudbinayaa guddiga.

## Qodobka 44-aad
## Cabashooyinka

1. Qof kasta oo ku qan ciwaaya go'aanka sanduuqa hawl-gabka ee arrimaha la xiriira xaq siinta oo guddiga ka soo baxa ama arrimo kale wuxuu cabasho u qoran karaa guddiga khilaafaadka.
2. Guddiga khilaafaadku wuxuu qoraal ku soo saarayaa go'aanka ay cabashada ka gaareen muddo soddon (30) maalmood gudahood ah ka dib markay codsiga heleen.
3. Haddii aanu qofku ku qancin go'aanka ay guddiga khilaafaadku soo saareen, wuxuu racfaan u qaadan karaa maxkamadda awooda u leh.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 45-aad
## Warbixinaha

1. Guddigu wuxuu soo saarayaa warbixin sanadeed ku aadan habsami u socodka hawlaha sanduuqa, wuxuuna u gudbinayaa Golaha Wakiillada iyo Golaha Xukuumadda.
2. Guddigu wuxuu warbixin ku aadan nidaamka maaliyadeed iyo xisaabeed u gudbinayaa Hantidhawrka guud ee dawladda markasta oo uu weydiisto.
3. Natiijo kasta oo ka soo baxda baarista hantidhawrka guud ee dawladda iyo kan gudahaba, waxaa guddigu u bandhigi karaan dadweynaha sodon (30) maalmood gudohood, ka dib marka la siiyo Golayaasha Wakiillada iyo Xukuumadda.

## Qodobka 46-aad
## Xeer-nidaamiyeyaal

Guddiga Sanduuqa hawl-gabku iyagoo la tashanaya mas'uuliyiinta ku shaqada leh iyo ka faa'iidaystayaasha Sanduuqa hawl-gabka, waxay soo saari karaan xeer-nidaamiyeyaasha lagama maarmaanka u ah arrimaha la xiriira:

b) Arrin kasta oo laga doonayo ama uu oggol yahay xeerkani waa in lagu qeexaa xeernidaamiye.
t) Fulinta iyo isku-xirka qaybaha Xeerkan.
j) Arrin kasta oo muhiim u ah ama sahlaysa in la qeexo, si loogu guulaysto ama kor loogu qaado ujeedooyinka xeerkan.

## Qodobka 47-aad
## Xogta

Hay'ad kasta oo Dawladeed, waxaa waajib ku ah;

b. Keydinta iyo ilaalinta xogta, buugta, diiwaannada, galalka iyo dukuminti kasta oo la xiriira hawl-gabka shaqaalaha rayidka ah ee dawladda.
t. Xogta, warbixinta, codsiyada iyo qoraalada looga baahan yahay waxay u gudbinayaan Wasaaradda.

## Qodobka 48-aad
## Canshuur

Wax canshuur ah lagama qaadayo lacagta hawl-gabka iyo Liiltirka ay mutaysteen amase la siinayo shaqaalaha rasmiga ah oo uu dhammaaday xiriirkoodii shaqo oo ay la lahaayeen Dawladda Puntland.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 49-aad
## Burin

Xeerarka, wareegtooyinka iyo xeer-nidaamiyeyaasha aan la socon karin guud ahaan ama qayb ahaan xeerkan waa la buriyey.

## Qodobka 50-aad
## Dhaqan-galka Xeerka

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland Saxiixo, laguna soo saaro faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Puntland.